Siyaasadda JLCD- U-maamulidda Daawooyinka Ardayda

Kalkaaleyaal Xirfad la yaal ah oo ka shaqeeya Dugsiyada Dadweynaha Denver kuwaasi oo degan Dugsigga Xarumaha Caafimaadka, ayaa u qori doona daawada ardayga. Ma jiro shaqaale kale ee ka shaqeeya Dugsiyadda Dadweynaha Denver oo daawo qori kara.

Daawadu waxaa la siin doonaa marka waalidku si cad u codsado kadibna u buuxiyo HESHIISKA BIXINTA CODSIGA DAAWADA ARDAYGA/ DALABKA TAKHTARKA DAAWADA.

Qaab ammaan iyo munaasab ah ee loo fulinayo codsigan ayuu Adeegaha Kalkaaliyaha horumarin doona. Waxay noqon doontaa mas'uuliyadda kalkaaliyaha dugsigga maareynta fulinta siyaasaddan. Codsiga waaalidka sidoo kale waa in uu la socdaa dalab warqad saxiixan oo ka socota takhtar/kalkaaliye xirfadle ah. Hawshan waa in uu la socodaa dhammaan qoraal daawo qoran iyo daawo aan-la socon qoraal takhtar. Dalabku waa in uu ku jiraa magaca daawada, qiyaasta daawada, wakhtiga, iyo qaabka loo qaato. Dalabka takhtarka/Kalkaaliyaha Xirfada lehi waxaa lagu soo diri karaa fakis.

Codsasho cusub waa in lala bilaabaa daawo kasta iyo isbedel kasta oo ku dhaca dalabka daawada. Midaana waxaa kamid ah isbedelada ku dhaca daawada, qiyaasta daawada, wakhtiga, ama qaabka daawada loo qaato. Lagu siidarey, foom cusub oo la socda dalabka Takhtarka/Kalkaaliyaha xirfada leh kaas oo ka saxiixan biloowga dugsi kasta sannadkiisa ee daawo kasta. (Ma jiraan daawooyin shakhsi ahaan loo maareysanayo heerarka ECE illaa 5.)

Ardayda cudurka Neefta qabta kuwaasi oo lagu diiwaan geliyay heerarka 6 illaa 12 waxaa loo oggolaan doonaa in ay neeftooda qaataan marka uu waalidku si cad u sameeyo codsi kadibna buuxiyo foomkan " HESHIISKA BIXINTA CODSIGA DAAWADA ARDAYGA/ DALABKA TAKHTARKA DAAWADA".

Waalidiintu waa in lagu booriyaa in ay ardaydu siiyaan daawadoodu wakhtiyo aan ahayn saacadaha dugsigga. Kaliya marka ay lagama maarmaan noqoto unbuu dugsiggu la wareegayaa mas'uuliyada maareynta daawada la soo qorey.

Haddii uu waalidku daawada u soo diro dugsigga asaga oo codsanaya in uu dugsigga bixiyo, kadibna foomkii kor lagu soo sheegay aan la buuxin, kalkaaliyaha dugsigga waa kaliya qofka waci kara Takhtarka/kalkaaliyaha xirfada leh kadibna taleefoonka ku qaadi kara dalab hadal ah. Foomka la buuxiyay waa in loo dhiibaa waalidka kahor inta aan lagu siinin dugsigga daawooyin dheeri ah.

Daawada la isku duro waxaa la siin doonaa marka duritaanku laga dalbado Takhtar/Kalkaaliye xirfad leh xagiisa. Ugu yaraantii labbo qof oo dugsigga joogta ayaa lagu tababarayaa sidii ay u maareyn lahaayeen DHAMMAAN daawooyinka.Illaaliye joogto ah ayaa kalkaaliyaha dugsiggu diyaarin doona.

Daawada la siinayo waalidka/mas'uulka waa in ay ku jirtaa dhallo laga bixiyay farmashiye. Calaamada farmishigana waa in ay la soctaa: magaca ardayga, magaca daawada, inta jeer ee daawadu la qaadanayo, qiyaasta daawada, iyo haddiiba ay habboontahay taariikhda daawadu la joojinayo.

Dhammaan daawooyinka oo dhan waa in lagu xifdiyaa oo lagu dhawraa armaajo xiran taas oo si fiican derbiga loogu dhejiyay. Hadii ay daawadu tahay mid u baahan in firinjiteerka la geliyo, hadaba markaasi kalkaaliyaha dugsigga ayaa wuxuu mas'uul kano qonayaa in uu keeno meel daawada la geliyo. Daawadu lama gelinayo firinjiteer ay cunto ku jirto. Kalkaaliyaha dugsigga ayaa u sheegi doona maamulaha haddii ay jirto muhiimad khusaysa arrintan.

Tuurida munaasibka ah ee la tuurayo daawada aan la isticmaalin waa mid muhiim ah. Waa mas'uuliyada waalidka in uu dib uga soo ceshto dhammaan daawooyinka la isticmaalay dugsigga marka daawadu la joojiyo, sannadka dugsiyeedka dhamaado, ama qoysku loo wareejiyo degmo kale. Dhammaan daawooyinka dugsigga looga tagay waxaa xooraya kalkaaliyaha dugsigga.

Qoraal kasta oo munaasib ah ee ku saabsan dhammaan daawooyinka uu xoorey shaqaalaha dugsigga waxaa laga dhigi doonaa dukumeenti waxaana lagu buuxin doonaa diiwaanka caafimaadka ardayda.

Shaqaalaha dugsigga looma oggola in ay talo ama amar ka bixiyaan in ardayga loo qorey daawooyin caqliga wax yeesha si uu dugsigga u yimaado. Shaqaalaha dugsigga waa in ay helaan oggolaansho hore oo qoran si ay u fuliyaan tijaabo dhaqanka ah; heshiis hore oo qoran oo ku saabsan muujinta natiijooyinka tijaabada ee ka yimaada waalidiinta/mas'uuliyeyaasha iyo ardayda marka ay suurtogal tahay. Dhammaan shaqaalaha dugsigga waa in ay kala hadlaan waalidiinta/mas'uuliyeyaasha muhiimada dhaqanka waana in ay u soo jeediyaan waalidiinta/mas'uuliyeyaasha la tashigaasi ay la jirto bixinta daryeel caafimaad ee munaasibka ah taasi oo u noqon karta waxtar ardayga.

La ansixiyay: 1 Sibteembar, 1956
Loo muraajaceeyay si loo waafijiyo habdhaqanka: Febraayo, 1994
La muraajaceeyay:13 Abriil, 2000
La muraajaceeyay: 2 Oktoobar, 2003

TIX RAACA SHARCIGGA.:
Kalkaalisada Samaynta Tababarka Colorado, Guddiga Dowladda ee Kalkaalinta, 1995
Qodobka Bixinta ee Samaynta Tababarka Kalkaalisada ee Colorado,1998
C.R.S. 12-38-102
C.R.S. 12-38-103 (4)
C.R.S. 12-38-108
Xeerarka Maareynta Daawada Dugsigga, Daabacada 3aad,
1998
Xeerarka Maareynta Daawada Dugsigga,, (TIXRAACA 9328), Dugsiga Tacliinta Sare ee Mareykanka ee Daaweynta Carruurta, 92, (3), 1993, p 499-500